# Ogeysiiska 30-ka Maalmood ee Imtixaanada Gobolka oo Dhan ee 2020-21

## DHAMMAAN ARDAYDA QALINJEBINTA U DIYAARSAN

Sannadkii 2010, Oregon waxay qaadatay heerarka sare ee K-12 ee farshaxanka luqadda Ingiriisida iyo xisaabta si loo xaqiijiyo in dhammaan ardayda ay uga kala gudbaan fasallada iyagoo leh aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah guusha dugsiga sare kadib. Waxaan hagaajinay qorshaha imtixaanka 2020-21 si ay u saamaxdo in la sameeyo qiyaasta la isku halleyn karo ee hawlqabadka ardayda, iyadoo hoos loo dhigayo waqtiga ay ardayda ku jiraan imtixaanka.

**Waqti intee le'eg ayay qaataan imtixaanadu?**
Imtixaanada lama muddeeyo, markaa ilmahaagu wuxuu qaadan karaa waqtiga uu u baahan yahay inuu si buuxda ugu muujiyo waxa uu yaqaano iyo waxa uu sameyn karo. Imtixaanadeena hadda jira, ilmahaagu wuxuu imtixaanka qaataa kaliya hal jeer sannadkiiba, si ka duwan imtixaanadeenii hore oo ay arday badani qaadan jireen dhowr jeer. Buugga Qaadista Imtixaanka Oregon ka ogow wax badan oo ku saabsan waqtiga qiyaasta ah ee ay ilmahaaga ku qaadan karto inuu ku dhammaystiro imtixaannada: https://tinyurl.com/TestAdmManual

**Maxay natiijooyinka macnahoodu yihiin iyo halkee ayaan ka helayaa natiijada ilmahayga?** Natiijooyinka imtixaanka guud waxay tilmaamaan awooda heerarka nidaamka iyo aagagga lagu horumarinayo farshaxanka luqadda Ingiriisida iyo xisaabta ee dugsiyada, degmooyinka, iyo gobolka. Waxay sidoo kale bixiyaan tusmada waxqabadka ilmahaaga. Maado kasta waxa loo warbixyaa qeybo waxayna muujineysaa waxqabadka ilmahaaga ee aag kasta. Imtixaanadu waxay u cabbiraan barashada ardayga si joogto ah. Gobolku wuxuu dejiyay afar heer oo lagu gaadhayo cabirkan guud oo sharraxaya waxa ilmahaagu yaqaanay ee uu awooday inuu ku sameeyo qiimeyntaas. Dugsigaaga ayaa kula wadaagi doona dhibcaha ilmahaaga bilowga sannad dugsiyeedka soo socda si ay u taageerto guusha ilmahaaga.

**Maxay ka qeybqaadashadu muhiim u tahay?**
In kasta oo uusan jirin hal imtixaan oo sawir buuxa ka bixinaya horumarka ilmahaaga, haddana in ilmahaaga laga qaado imtixaanada gobolka oo dhan waxay siinaysaa barayaasha iyo maamulayaasha macluumaad heer nidaam ah oo ku saabsan hababka waxbarashada ee shaqeynaya iyo halka loo baahan yahay in lagu kaabo ilo dheeraad ah. Ka qeybgalka ilmahaagu waa muhiim si loo xaqiijiyo in dugsiyada iyo degmooyinku ay helaan ilaha bartilmaameedsan ee ay u baahan yihiin si looga caawiyo dhammaan ardayda inay guuleystaan, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda taariikh ahaan dadyowga aan si buuxda loogu adeegin.

## IMTIXAANADA GOBOLKA OREGON:

- **Waxay ka caawiyaan aqoonsiga dugsiyada iyo degmooyinka** u baahan taageerooyin dheeri ah si loo xaqiijiyo in arday badan ay gaaraan heerar sare
- **Waxay ku xujeeyaan ardayda inay si qoto-dheer u fikiraan** una adeegsadaan aqoontooda dhibaatooyinka dunida dhabta ah
- **Waxay adeegsadaan shay qaabeedyo badan** si loo xaqiijiyo qaababka badan ee lagu heli karo waxa ku jira sheyga
- **Waxay u shaqeysaa sida tusmo yar oo muujinaysa horumarka ilmahaaga** waxaana laga yaabaa in lala tixgeliyo qeybo kale oo macluumaad ah si loo fahmo awoodda iyo baahida waxbarasho ee ilmahaaga

## XILLIYADA IMTIXAANAADKA EE GOBOLKA OO DHAN

Dugsiga Sare ee farshaxanka luqadda Ingiriisida & xisaabaadka imtixaannada gebogabada Janaayo 5 - Juun 4, 2021

Fasalada 3-8 Farshaxanada luqadda Ingiriisida & xisaabaadka imtixaannada gebogabada Maarso 4 - Juun 4, 2021

**Goorma ayuu ilmahaygu imtixaanka galayaa?**
Ilmahaaga hal mar ayaa la imtixaami doonaa. Dugsiga ilmahaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee uu ilmahaagu qaadanayo imtixaanada gudaha xilliga imtixaanka kore ee gobolka oo dhan.

## XOG OGAAL AHOW

**La hadal macallinka ilmahaaga ama maamulaha dugsiga haddii aad wax su'aalo ah qabto ama aad rabto inaad wax dheeraad ah ka oggaato sida aad uga taageeri karto ilmahaaga farshaxanka luqada Ingiriisida iyo xisaabta. Waa kuwan qaar ka mid ah ilaha dheeraadka ahi**:

http://tinyurl.com/ELARoadmap & http://tinyurl.com/MathRoadmap Si aad u eegto muunada su'aalaha imtixaanka: http://tinyurl.com/ORPracticeTests

Si aad wax badan uga akhriso natiijooyinka imtixaanka ilmahaaga: http://tinyurl.com/ORTestResults

Oregon Department of Education
Oregon achieves . . . together!

# Foomka Ka Saarista 2020-21

## SHARAXAADDA XUQUUQDA

Qodob Sharciyeedka 2655 wuxuu u fasaxayaa waalidiinta iyo ardayda qaangaarka* ah inay sannad kasta ka baxaan imtixaanada gebogabada ee gobolka Oregon oo dhan ee farshaxanka luqadda Ingiriisida iyo xisaabta iyagoo u gudbinaya foomka dugsiga uu ardaygu dhigto. Dugsigu waa inuu siiyaa arday kasta oo laga dhaafay imtixaanka gobolka waqti barasho oo la kormeero inta ardayda kale ay imtixaanka ku jiraan. Booqo liinkigan si aad wax badan uga oggaato Qoddob Sharciyeedka 2655: http://tinyurl.com/OR-HB2655.

**Si looga saaro imtixaanada guud ee farshaxanka luqadda Ingiriisida iyo xisaabta ee gobolka, qeybtan waa inuu buuxiyaa waalidka/mas'uulka ama arday qaangaar ah:**

Aqoonsiga PPS ee Ardayga ___________________

Magaca Dambe ee Sharciga ah ee Ardayga____________________________________________________________

Magaca Koowaad ee Sharciga ah ee Ardayga__________________________________________________________

Fasalka uu Qoranyay Ardaygu ___________________

Dugsiga Ardayga ___________________________________________________________________

**Fadlan muuji imtixaan(ka/aadka) gobolka ee aad ka saarayso sannad dugsiyeedka 2020-21:**

| | |
|---|---|
| | Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida |
| | Xisaabta |

Si aad si fiican ugu taageerto qorsheynta dugsiga degmada, waxa lagugu dhiirigelinayaa inaad u soo gudbiso foomkan **dugsiga ilmahaaga** ugu dambeyn Janaayo 1, 2021. Ardayda isqorta kadib marka uu furmo xilliga imtixaanka guud ee ardayda dugsiga sare wuxuu bilaabmayaa Janaayo 5, 2021 halka ardayda Fasalada 3-8 uu bilaabmayo Maarso 4, 2021, waxa lagugula tallinayaa inaad kusoo gudbiso foomka 2 toddobaad gudahood kadib isqorista. Foomkani wuxuu shaqeynayaa oo keliya sannad dugsiyeedka 2020-21. Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan foomka-ka-saarista sannad walba haddii ay rabaan in laga saaro imtixaannada guud ee gobolka.

**Waxaan fahansanahay in markaan saxeexo foomkan aan ka saarayo ilmahayga imtixaanka.**

Waalidka/Mas'uulka*__________________________________________Taariikhda___________
*(Saxeexa)*

Waalidka/Mas'uulka* ____________________________________________________________
*(magac oo qoran)*

Ardayda waaweyn (da'da 18 ama ka weyn) ayaa iskood u saxeexi kara umana baahna in waalid ama mas'uul uu u saxeexo.